

FAAFINTA

RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka sagaalaad Moqdisho 20 Dis. 1981 L. 3R12

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100

Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

- SHARCI Lambar 63 Taariikh 8 Dic. 1981, oggolaansho heshiis amaah ah BOG. 1814
oo dhexmaray J. D. S. iyo Sanduuqa Kuweyt ee horumarinta Dhaqaalaha Carbeed oo loogu talo galay Mashruuca Mugaambo.
- SHARCI Lr. 63 ee 9 Dis. 1981, Meel-marin heshiis » 1815
- LAW N. 63 on 9 Dis. 1981, Instrument of of Radification » 1816
- SHARCI L. 64 ee 12 Dis. 1981, Sharci Sharci dib u furidda keenitaanka ba-deecada iyo qaybintoodaba » 1817
- SHARCI L. 65 ee 12 Dis. 1981, Sharciga dib u soo celinta Ruqsadaha iyo ilaalinta lacag adag » 1818

Wakaaladda M. Qaranka

SHARCI L. 63 ee 9 Disembar 1981, Meel marin Heshiis.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Cod. 67aad xubintiisa 5aad, cod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Cod. 7aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Amaahda «Dayn Lam. 192» oo Mashruuca beeraha ee Mugaambo, dhameeyey Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Kuweyt ee Horumarinta Carbeed, taariikhdu markay ahayd 14. 7. 1981.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Sharciga oggolaanshada Golaha Shacbiga ee lambar 63 ee Heshiiska taariikhdiisuna ahayd 8dii Diseembar 1981.

Wuxuu soo saaray xeerkan soo socda:

Qodobka 1aad

Heshiiska amaahda ee Mashruuca Waraabka ee MUGAAMBO, dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Kuweyt ee Horumarinta dhaqaalaha Carbeed, laguna kala saxiixday Magaalada Kuweyt 14 7 1981,

Qodobka 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah.

Xeerkani wuxuu dhaqaa gelayaa markuu saxeexo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya: waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 9kii Disembar 1981,

MADAXWEYNAHA

SAREEVE GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE

LAW No. 63 of 9th Dec. 1981 Instrument of Radification

HAVING SEEN: Article 67 para 5, Article 82 para 4 and Article 72 para 1 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Loan Agreement «Loan No. 192» for Mogabo irrigation project between the Government of the Somali Democratic Republic and Kuwait fund for Arab Economic Development signed at Kuwait, on 14th July, 1981.

TAKING NOTE: Law No. 63 of the People's Assembly of the said Agreement dated 8th December, 1981.

Hereby promulgates the following Decree:-

Article 1

The Government of the Somali Republic hereby reifies the Loan Agreement «Credit No. 192» for MOGAMBO irrigation project between the Government of the Somali Democratic Republic and the Kuwait fund for Arab Economic Development signed at Kuwait on 14th July 1981.

Article 2

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic.

This Decree shall enter into force upon signature by the President of the Somali Democratic Republic; and shall be published in the Official Bulletin of the state.

Mogadishu, 9th December, 1981

President of the
Somali Democratic Republic

MAJOR GENERAL, MOHAMED SIAD BARRE

Sharci Lambar. 64 taariikh 12 Disembar 1981.
Sharciga dib u furidda keenitaanka badeecada iyo qaybintoodaba.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga
Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa dib loo furay keenitaanka badeecada ha iyo qaybintoodaba.

2. Waxaa Hay'adaha Dawladda, Shirkadaha iyo Ganacsatada gaar ahaaneedba awood u leeyihiin inay ka qayb qaataan keenidda iyo qaybinta badeecadaha.

3. Keenitaanka badeecadahaas waxaa ka reeban kuwa uu diidayo sharci gaar ahaaneed.

Qodobka 2aad

Sharci ama Xeer kasta oo kaasoo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan waa la baabi'yey.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Mogadishu, 9th December, 1981

MADAGWEYNAHA J. D. S,

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI Lambar 65 taariikh 12 Dis. 1981.
Sharciga dib u soo celinta ruqsadaha iyo ilaalinta lacag adag. ,

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGENAAYA: Oggolaanshaha Guddiga
jootada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda;

Qodobka 1aad

1. Waxaa dib loogu soo celiyey Guddiga Ruqsadaha iyo ilaalinta Lacagta Adag awooddii uu hore ugu lahaa Sharciga Lam. 12 ee 26. 9. 1964.

2. Sidoo kale ayaa dib loogu soo celiyey xilkii iyo awooddii Guddiga looga wareejiyey Sharciga Lam. 19 soona baxay 6. 4. 1978 oo lagu dhisay Guddiga Iibka Qaranka iyo Horumarinta dhaqaalaha, gaar ahaan Qodobkiisa 3aad, xarafkiisa «J .

Qodobka 2aad

Sharci ama Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan waa la tirtiray (waa la beddalay).

Qodobka 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 9 Dis. 1981

MADAXWENAHHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI Lambar 66 Taariikh 13 Dis. 1981.

kordhinta gunnada Ardada Shaqada Qaranka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Guddiga
joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Gunnada Ardada Shaqada Qaranka ee lagu xaddiday sharciga tirigiisu yahay 71 ee 11 NOV. 1971. waa la kordhiyey, waxaana la gaarsiiyay bishiiba Sh: So. 450 (Afar Boqol iyo Konton):

Qodobka 2aad

Gunnada ku tilmaaman Qodobka 1aad ee sharci-gaan laga goyn maayo canshuurta horumarinta iyo tan dakhliga:

Qodobka 3aad

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 1da Disembar 1981ka, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 9 Dis. 1981

MADAXWEYNAHA ; D; S;

(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA

LABAAD

XEER

XEER, Madaxweynaha JDS, L. 66 ee 9 Disembar 1981;
MADAXWEYNAHA JDS

Lacag cusub oo xaashi ah uu soo saari doono Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed)

MARKUU ARKAY: Qodobka 82 xarafka 14aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Qodobka 5aad ee Xeerka Lr. 2 ee soo baxay 26kii Maarso 1961, loona beddeley Sharciga Lr. 13 ee soo baxay 23kii Maajo 1961, kuna saabsan nidaamka lacagta Soomaaliya.

ASAGOO TIXGELINAYA: Baahida loo qabo in dhaqlo loo kordhiyo lacagta xaashida ah lana caddeeyo tiradeeda, farsamadeeda iyo farshaxankeeda.

OSOGOO ARKAY: Go'aanka Golaha Wasiirrada, iyo talada uu soo jeediyey Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka 100 socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday in Bankiga Dhexe ee Soomaaliya uu soo saaro:

B) 6.000.000 (lix milyan) xabbo oo ah xaashida 100 (Boqolka) Shillin, qiimaheeduna dhan yahay Sh. So. 600.000.000 (lix boqol milyan) Shilin, una qaybsan lix-horimood «Serios» oo midkiiba yahay 1.000.000. xaashiyood oo i ugu xiriirra lambar isdabajoog ah oo ka bilawda 000001 ilaa 1.000.000 sitana xarafka «KH» oo uu dambeeyo lambarka 001 ilaa 006.

T) 20.000.000 (labaatan milyan) xabbo oo xaashida 20 (labaatanka) shilin, qiimah duna dhan yahay Sh. So. 400.000.000 (afar boqol milyan) Shilin una qaybsan 20 horimood «Serios» oo midkiiba yahay 1.000.000 xaashiyood, isuguna xiriira lambar isdaba joog ah oo ka bilawda 000001 ilaa 1.000.000, sitana xarafka «KH» oo uu ka dambeeyo lambarka 001 ilaa 020.

Qodobka 2aad

Xaashi lacageed 20 iyo 100 oo shilin Soomaaliga ah, oo qodobka hore lagu tilmaamay tiradooda, waxaa si tifaftiran loogu caddeeyey summadda iyo farsamada xeerka Golihii Saer ee Kacaanka Lr. 135 soona baxay 11.12. 1974kii, iyo Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya ee 6dii Disembar 1977kii Lr. 74, iyo Xeerka MJDS Lr. 52 ee 5tii Abriile 1980.

Qodobka 3aar

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

Muqdisho, 9 Dis. 1981

(Jaalle Maramed Siyaad Barre)

Madaxweynaha BDS

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 67 ee
27 Okt. 1981 Dallacaad Saraakiileed.

MADAXTOOYADA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobka 82aad,
ISAGOO ARKAY: Sharciga Lamb. 2 ee 23.12.1972kii
oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska Soomaa
liyeed.

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Tali-
yaha Ciidanka Boliiska kuna qoran Xaashida Lam.
GOX.8.1. ee 27.10.1981,

WUXUU XEERAY:

Qod. 1aad

In Saraakiisha hoos ku qoran oo ka tirsan Ciidan-
ka Boliiska Soomaaliyeed loo dallacsiiyo derejada mi-
dkasta magaciisa ku hor qoran marka aga bilaabo
2.11.1991. Taasoo ay ku mutaysteen hawlkarnimo iyo
dadaal dheeraad ah oo ay muujiyeen:

1. Dhamme Maxamed Xaaji Jaamac Cabdi G/le
2. Dhamme Maxamed Cali Maxamed Gaashaanle
3. L/X. Cusmaan Diiriye Jiilaal Dhamme
4. X/le Xasan Maxamed Maxamuud Laba Xiddigle

QODOBKA 2aad

Xeerkani deg deg buu u dhaqan gelayaa, waxana
lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Daw-
ladda.

Muqdisho, 27.10.1981.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaangelinay,
Diiwaanka L. 7 bog. lam. 137,

Muqadisho 11 Maajo 1981,

Hantidhowraha Guud
Yuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 68 ee 26 Oktobar
1981Dallacaad Saraakiileed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J. D. S. qodobka 82aad.

ISGOO ARKAY: Sharciga 2ee 23/12/1972dii oo ku saas-
san dhismaha ciidanka booliiska Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY: Talada uu soo jeediyey taliyaha Cii-
danka booliska soomaaliyeed ee ku qoran xaashida
lambar XOG/A/8.1 ee 25.10.1981.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

in saraakiisha iyo Kormeerasha hoo ku qoran oo ka
Tirsan ciidanka booliska soomaaliyeed loo dalacsiiyo

Derejada midkasta magaciisa ku hor qoran markalaga
bilaabo 1/11/1981, taasoo ay ku mutaysateen hawlka-
nimo iyo dadaal dheeraar ah oo ay muujiyeen:

1. dhamme Ibraahim culusow Rooble Gaasaanle
2. Dhamme Nuur Kulane Xasan Gaashaanle
3. dhamme Axmed Diini Hilowle Gaashaanle
4. Dhamme Cabdullaahi Cali Ibraahim — Gaashaanle
5. L/Xiddigle Aadan Ciise Cigaal — Dhamme
6. L/Xiddigle Axmed Cabdiraxmaan Mire — Dhamme
7. L/X/le Cabdiraxmaan Max'ed Mahdi — Dhamme
8. L/Xiddigle Max'ed Cali Yuusuf — Dhamme
9. L/X/le Caydiid Faarax Abyan — Dhamme
10. Xiddigle Bashiir Cabdi Maxamed — L/Xiddigle
11. Xiddigle Axmed Maxamed — L/Xiddigle
12. Xiddigle Xasan Calasow Maxamed — L/Xiddigle
13. Xiddigle Cabdi Cusmaan Saalax — L/Xiddigle

15. Xiddigle Muxyadiin Axmed Cabdi — L/Xiddigle
16. Xiddigle Cabdulle Sheekh Siciid — L/Xiddigle
17. Xiddigle Cabdow Cabdalle Cabdow — L/Xiddigle
18. Xiddigle Xaaji Maxamed Xasan — L/Xiddigle
19. Xiddigle Cabdullaahi Xaaji Yuusuf — L/Xiddigle
20. Xiddigle Yuusuf Cali Raage — L/Xiddigle
21. Xiddigle Qaasim Sheekhuna Maye — L/Xiddigle

QODOBKA 2AAD

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxana lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda

Muqdisho, 26.10.1981.

— MADAXWEYNAHA J.D.S. —
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaangelinay,
Diiwaanka lambar 7 bog. lam. 155,

Muqdisho, 11 Nof. 1981,

Hantidhowraha Guud,
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA J,D,S, L. 70 ee 7 Abr, 1981
Meeleyn Kormeerayaal hore uga tirsanaa Ciidanka Ilaalinta Degaanka Muqdisho, oo lagu soo Wareejiye Shaqaalaha Rayadka D. Hoose ee Muqdisho.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad (Xubinta 14aad) ee Dastuurka JDS.

ISAGOO ARKAY: Xeerka Lamb, yahay 46 ee 16,9.79 ee uu ku dhaqan galay Dastuurka J,D,S,

ISAGOO ARKAY: Sharciga Dhismaha Golayaasha Shacbiga Degaannada, Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka.

ISAGOO AY: Ugu muuqatay lagama maarmaan in Jaallayaasha laga wareejiyey Ciidanka Ilaalinta Degaanka, laguna wareejiyo Shaqaalaha Rayadka ah D. Hoose ee Muqdisho, maadaama meeshan Dambe uu wax tarkoodu ka roon yahay.

ISAGOO TIXGELIYEY: Tala Jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho; lana xiriirta isla Arrintan.

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN:

Qod. 1aad

Laga billaabo maalinta Madaxweynuhu Xeerkan Saxiixo, waxaan Jaallayaasha hoos ku qoran laga wareejiya Ciidanka Ilaalinta Degaanka Muqdisho, oo ay in muddo ah hore uga tirsanaayeen, laguna wareejiyay Shaqaalaha Rayadka ah D. Hoose ee Muqdisho, kadib markii la ogaaday.

In hawl qabad ahaan uu wax waxtarkoodu ka roon yahay meesha dambe.—

Qodobka 2aad

Jaallayaasha la wareejiyay, waxay hadda wixii ka dambeeya lagu meeleeay oo ay ku mushaar qaadan doonaan darajada iyo lacagta midwalba hortiiisa ku qoran.—

MAGACA IYO DAR. HORE. MUSH. IYO GUNNADII
HORE. DAR. IYO MUSH. CUSUB.

1. K/2aad Cali Nuur Maxamed Sh. So. 1000/= B7. Sh. So
1000/=
2. K/2aad Maxamed Cali Maye Sh. So. 1000/= B7. » ».
1000/=
3. K/1aad Maxamed kulmiye tooxow » » 800/= B8 800.
4. K/1aad Axmed yaaquub axmed » » 800/= B8 800/.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan geliyaa marka uu saxiixo
madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saari doonaa
faah faahinta Rasmiga ee JDS.

MADAXWEYNAHHA J.D.S.
S/Gaas Maxamed siyaad bare.

Waan ragnay ee Diiwaangelinay,
Diiwaanka lambar 4 bogga lamb. 90,
Muqdisho, 7 Abriile 1981
Hantidhowraha Guud,
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 71 EE 23 APRIL 1982
OGGOLAASHO SHAQO KA TEGID.

MADAXWEYNAHA DS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad (Xubinta 14aad) ee Dastuurka.

ISAGOO ARKAY: Xeerka Lamb. yahay 46 ee 16.9.1979 ee uu ku dhaqan galay Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Go'aanka Guddiga Daryeelka Arrimaha Shaqaalaha iyo Guddiga Joogtada G/Shacbiga Degaanka Muqdisho ee la xiriira Oggolaasho Shaqo ka tegid J/le Ibraahim Jumcaale Jannaqow, kana tirsanaan jiray Shaqaalaha D/Hoose ee Xamar, taasoo loo cuskaday Dhibaato Qoys awgeed.

ISAGOO TIXGELIYEEY: Tala Jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho.

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maalinta Madaxweynuhu soo Saxiixo, waxaa Xeerkan Shaqo ka tegid looga Oggolaaday Jaalle Ibraahim Jumcaale Jannaqow, kana tirsanaan jiray Shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho, Darajadiisuna tahay «A6—2» kaddib markii uu Arji Shaqo ka tegid ah uu soo qortay Maamulka Dawladda Hoose ee Muqdisho.

MADAXWEYNAHA

Qod. 2aad

Jaalaha Shaqo ka tegidda laga Oggolaaday, waxaa lagu Xaq siin doonaa Sannadkiiba Bil Mushaarkeed iyo wixii Fasax ah oo Sharciyiisii uu oggol yahay.

Qod. 3aad.

Xeerkan, waxaa lagu soo saari doonaa Faah faahin
ta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 23-APR. 1981

Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Waan aragnay ee Daawiingelinay,
Diiwaanka lambar 4 bogga lambar 89,

Muqdisho, 22 Juunyo 1981

Hantidhowraha Guud,
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 72EE 7ABRIL1981
Darajo ka bedalaad jaalayaal ka tirsan shaqaalaha
D/HOOSE ee xamar oo soo dhamaystay Dugsiga sare

MADAXWEYNAHA DS

ISAGOO ARKAY : Qod. 82aad (xubinta 14aad) ee das
tuurka DS'.

ISAGOO ARKAY : Xeerka lam.yahay 46 ee 16.9.79 ee
uu ku dhaqan galiyey dastuurka J.D.S.;

ISAGOO ARKAY : shahaadooyinka ka marag kacaya
in jaalayaasha hoos qoran ay soo dhamayteen
dugsigasare;

ISAGOO ARKAY : Qod. 19aad ee sharciga lam.yahay
5 ee 2.21980 oo xaq u siinaya in qofka sida shahaa
dadadugsiga sare lagu meeleyo da rajada B10.;

ISAGOO TIXGALIYEEY: Tala jeedinta ku/s. Duqa mag
aalada muqdisho.;

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN:

Qodobka 1aad

Laga soo bilaabo markii taariikhdu ahayd 1.11981
waxaa jaalayaasha hoos ku qoran laga bedeley
darajooyinkii ay hore uga mushaar qaadan jireen' kadib
markii shahaada ah dugsiga sare ay la yimaadaan.

Qod. 2aad

Jaallayaasha hoos ku magacaaban, waxay ku mu-
shaar qaadan doonaan darajada mid walba ku hor qo-
ran:

MAGACA DARAJADII HORE DARAJADA CUB.

1. J/le Sahra Cali Axmed C-10 Sh.So. 470 B10.2Sho.470.
2. Madiina X. Warsame Caddow c10 Shs. 450 B10 Shs.
450/=

3. J/le Kheyra Xasan Raage c11 Shs. 350 B10 Shs.450
Qod-3aad

Xeerkani' dhaqan galayaa markii uu saxiixo
Madaxwenaha JDS.

S A X I I X A

Muqdisho, 7 APR. 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

J/le Maxamed siyaad bare

Waan aragnay ee Diiwaangelinay,
Diiwaanka lambar 4 bogga lambar 143,

Muqdisho, 26 Juunyo 1981,

Hantidhowraha Guud,
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 73 ee 6 Abriile 1981

Dallacsiin Shaqaale.

MADAXWEYNAHA DS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad (xubinta 14aad) ee Dastuurka JDS.

ISAGOO ARKAY: Xeerka Lamb. yahay 46 ee 6.9,69, laguna dhaqan geliyey Dastuurka JDS.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Maamulka Golayaasha Shacbiga Deegaannada Lamb. yahay 6 ee 12.2,1980

ISAGOO ARKAY: Tala jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho,

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN:

Qod. 1aad.

Laga billaabo 1.2.1981, waxaa Xeerkan lagu Dallacsiiyey Min hal Derejo Jaallayaal ka tirsan Shaqaalaha D. Hoose, kuwaasoo ka muujiyey Goobaha Shaqada Fir Fircooni, Hawl karnimo, iyo Kacaanimo.

MADAXWEYNAHA

Qod. 2aad.

Jaalleyaasha la Dallacsiiyey waxey ku Mushaarqaadan doonaan Derejada mid kasta ku hor qoran, waxayna xaq u leeyihiin Kororsiimada caadiga ah ee Shaqaalaha Dawladda.

MAGAC. D. HOOSE D, CUSUB,

- | | |
|--------------------------------------|-------|
| 1. Cabdi Abshir Yuusuf B/6-1060 A/5- | 1000= |
| 2. Ciise Warsame Xasan B/8- 800 B/6- | 1000= |
| 3. Aamina Xaaji Cilmi B/9- 600 B/8- | 800= |

4. Maxamed Cabdalla Xuseen B/10 = 450 B/9-4- 720 =
5. Cabdi Jaamac Maxamed B/10- 450- B/9— 600 =
6. Faaduma Cali Culusow B/10- 450— B/9— 600 =
6. Maxamed Nuur Maxamed B/10— 450- B/9— 600 =
8. Ibraahim Axmed Cumar B/10— 450- B/9— 600 =

Qod. 3aad.

Xeerkan, waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta
Rasmiga ah ee J. D. Soomaaliya,

S A X I I X

Muqdisho, 7 Abr. 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S,

J/le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre.

Waan aragnay ee Diiwaangelinay,
Diiwaanka lambar 4 bogga lambar 242,

Muqdisho, 23 Luulyo 1981

Hantidhowraha Guud

Dr. Xuseen Cabdulle Cali

100

101

102

103

104

105

106

107

108

109

110

111

112

113

114

115

116

117

118

119

120

121

122

123

124

125

126

127

128

129

130

131

132

133

134

135

136

137

138

139

140

141

142

143

144

145

146

147

148

149

150

151

152

153

154

155

156

157

158

159

160

161

162

163

164

165

166

167

168

169

170

171

172

173

174

175

176

177

178

179

180

181

182

183

184

185

186

187

188

189

190

191

192

193

194

195

196

197

198

199

200